

Macluumaadka safarka gaaban ee loogu talagalay xannaaneeyayaasha/waalidiinta

Excursion information for parents/carers

Gacaliye xannaaneeye/waalid

Waxaa loo qorsheynayaa safar gaaban ilmahaaga fasalkiisa si uu u xoojiyo shaqada fasalka dhexdiisa lagu qabto. Faahfaahinta safarkan gaaban waa ta hoose.

Excursion details for completion by organising teacher

Faahfaahinta safarka gaaban

Place of excursion
Goobta safarka gaaban

Date/s of excursion
Taariikhda/ha safarka
gaaban

Place of departure
Goobta laga baxayo

Time of departure
Wakhtiga bixitaanka

Place of return
Goobta lagu soo noqonayo

Time of return
Wakhtiga soo noqoshada

Cost of excursion
Kharashka safarka gaaban

Payment due date
Lacag bixinta wakhtiga
layska rabo

Excursion objectives
Ujeedooyinka safarka
gaaban

Transport details
Faahfaahinta gaadiidka

Staff member with emergency care training
Xubinta shaqaalaha eel eh tababarka daryeelka
xaalada degdega ah

Staff member with Cardio Pulmonary Resuscitation (CPR) training
Xubinta shaqaalaha ee leh tababarka kicinta wadnaha iyo
sambabada (CPR)

Other supervisory staff
Shaqaalaha kormeerida
ee kale

Teacher to tick what students need to bring

Ardeydu waxay u baahan doonaan inay u soo qaataan safarka gaaban alaabtan

Dharka dabaasha, shukumaanka iyo boorso bac ah
Swimsuit, towel and plastic bag

Ka soo qaado cunto fudud, qado iyo cabitaan guriga
Bring snacks, lunch and drink from home

Dhar aan biyuhu qoyn tusaale tusaale, koorka
roobka
Waterproof clothing e.g. raincoat

Qado waxaa la soo gadan karaa inta lagu
safarka gaaban
Lunch can be bought during the excursion

Dhar bedelaad ah
Change of clothing

Kharashka qadadu wuxuu ku jiraa kharashka
safarka gaaban
Cost of lunch is included in excursion cost

Dhar diiran
Warm clothing

Dharka dugsiga oo dhan
Full school uniform

Koofiyada qoraxda iyo kareemka qoraxda
Sunhat and sunscreen

Wax kale
Other

Nashaadka kale ee ku lugta leh safarkan gaaban hoos ayaa laga saxayaa macluumaad dheeraad ah waxaa lagu bixiyey boggaga soo socda, haddii ay khuseeyso

Teacher to tick any other activities involved in this excursion

Wax nashaad ah oo kale ma jiraan

No other activities

Safarka diyaarada

Travel by air

Ceymiska safarka

Travel insurance

Nashaadka dabaasha

Swimming activity

Nashaadka biyaha

Water activity

Safarka gaaban ee habeen dhaxa

Overnight excursion

Tallada safarka gaaban ee habeen dhaxa (Overnight excursion advice)

Safarada gaagaaban ee ku lugta leh joogitaanka habeen dhaxa macluumaadka soo socda ee dheeraadka ah ayaa la bixiyey.

Teacher to complete if relevant. Consider adding advice on the number of students and teachers who will be attending and if protective or special equipment will be required.

Meeshii hoy la balamiyey (Where accommodation is booked)

Macluumaad dheeraad ah (Additional information)

Tallada ceymiska safarka (Travel insurance advice)

Wasaaraddu waxay ku talinaysaa in xannaaneeyayaasha /waalidiintu inay u sameeyaan ceymiska safarka ardeyda wixii ah safarada gaagaaban ee ku lugta leh safarka hawada.

Tallada nashaadka dabaasha (Swimming activity advice)

Safarada gaagaaban ee ku lugta leh nashaadka dabaasha xannaaneeyaha/waalidku waa inay ku buuxiyaan 'Foomka tallada nashaadka dabaasha' Ingiriis iyagoo soo sheegaya awooda dabaasha ee ilmahooda oo ay dugsiga ku soo celiyaan. Foomku wuxuu bixinayaa macluumaad ah noocyada nashaadka dabaasha ee dhici doona, Meesha lagu heyn doono oo ay ka raali yihiin inay ka qaybgalaan nashaadadan. Dugsigu wuxuu siin doonaa qalabka sabeeya ee hoose ardeyda uga baahan caawimaad biyaha dhexdooda.

Qalabka sabeeya ee la bixin doono, haddii uu khuseeyo

Types of flotation devices to be provided by the school and how they will be used

Tallada nashaadka biyaha (Water activity advice)

Safarada gaagaaban ee ku lugta leh nashaadka biyaha xanaaneeyaha/waalidka waa inay buuxiyaan 'Foomka tallada nashaadka biyaha' Ingiriis iyagoo soo sheegaya ilmahooda awoodooda dabaasha oo ay ku soo celiyaan dugsiga. Tani qorshe ka sii taxadarid ah. Inkastoo nashaad dabaal oo la qorsheynayaa uusan jirin waxaa laga yaabaa inuu ilmuhi si lama filaan ugu dhaco biyaha. Foomku wuxuu ka bixinayaa macluumaad nooca nashaadka biyaha ee dhici kara, Meesha lagu heyn doono iyo ka raali ahaanshaha ka qaybgalka nashaadyadaan.

Tallada arimaha gaarka ah (Privacy advice)

Macluumaadka lagu codsaday foomkan waxaa ururisay Wasaaradda Waxbarashada ee NSW. Macluumaadka waxaa loo qaaday ujeedada in la xaqiijiyo macluumaadka caafimaad ee khuseeya, waxa layska rabo iyo baahiyaha kale daryeelka caafimaadka la xiriira ee ku saabsan ilmahaaga hadda ka diiwaangashan dugsiga ee laga yaabo inuu ka qaybgalo safarada gaagaaban ee dugsiga, nashaadka cayaaraha ama nashaadyada dugsiga ama waxbarasho ee kale uu sameeyo ama dugsiga lagala shaqeeyo.

Waxaa isticmaali doona dugsiga si loogu qorsheeyo, si loo taageero ardeyda, iyo in la yareeyo khataraha marka la sameynayo safarada gaagaaban ee dugsiga ama kuwa kale ee la xiriira nashaadka dugsiga.

Dadka kale ama hay'adaha kale ee laga yaabo in la siiyo macluumaadkan waxaa ka mid ah, laakiinse kuma xaddidna, iskaa wax u qabso iyo xubnaha kale ururada bannaan ah ee dugsiga ku soo biira dugsiga ama haddii kale ku lug leh qorsheynta ama bixinta safarka gaaban, cayaaraha ama nashaadka dugsiga ee kale; iyo dadka laga yaabo in loo yeero si ay u bixiyaan daaweynta daryeelka caafimaad ama caawimaad kale inta lagu jiro ama wax ka dhashay nashaadyadaan ama safaradaan gaagaaban.

Bixinta macluumaadkan waa ikhriyaari, si kastaba ha ahaatee, haddii aadan bixin dhammaan ama wax ka mid ah macluumaadka la codsaday, ilmahaagu kama qaybqaadan karo safarkan gaaban. Xaaladahaan oo kale, dugsigu wuxuu u sameynayaa bedel wanaagsan oo waayo aragnimo waxbarasho ah leh.

Bixinta macluumaadkan wuxuu aad u caawinayaa dugsigu inuu qorsheeyo nashaad waxbarasho oo ka sii amaan badan. Waxaa loo keydinayaa si nabad ah. Haddii ay jiraan waxaad saluugsan tahay oo ku saabsan bixinta macluumaadkan, fadlan la xiriir maamulaha dugsiga si aad ugala sii hadasho.

Waxaa laga yaabaa inaad saxdo wixii ah macluumaad shakhsiyeed oo bixisay wakhti kasta adoo kala soo xiriiraya xafiiska dugsiga lambarka taleefanka ee hoose.

Teacher to complete the following information

School name _____
Magaca dugsiga

School phone number _____
Taleefan lambarka dugsiga

Name and signature of excursion coordinator _____
Magaca iyo saxiixa xiriiriyaha safarka gaaban

Name and signature of principal _____
Magaca iyo saxiixa maamulaha

Date _____
Taariikh

Adeega Turjubaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan wac dugsiga. Haddii aad u baahan tahay turjubaan kaa caawiya adiga weydiintaada fadlan ka wac adeega turjubaanka taleefanka 131 450 kuna weydiisana turjubaan luuqadaada ah. Xiriiriyaha ayaa wici doona dugsiga oo khadka soo gelin doona turjubaan kaa caawiya wada hadalka. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.